



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Febraayo 11, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Warbixinta saddexdii biloodba mar ah ee loogu talagalay SB 710

[Sharciga Senate-ka ee 710](#) (SB 710) ayaa dhaqan galay Sibtambar 1, 2021. Sharciga ayaa dejiya adeegsiga xakameynta 'restraint' iyo go'doominta aan ikhtiyaarka ahayn ee carruurta hesha adeegyada guud ahaan dhowr hay'adood oo uu ka mid yahay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ee goobaha carruurta. Sharciga ayaa lagu daray shuruudaha warbixinta cusub oo loogu talagalay Guri Wax Marti Geliya iyo barnaamijka Guryaha a degan yahay ee Carruurta ee ka tirsan ODDS.

Warbixinta u horreysa ee loogu talagalay Sibtambar–Diisambar 2021 ayaa iyada oo ku qoran Ingiriisa laga helayaa <https://go.usa.gov/xtGXA>.

Turjumaadaha warbixinta ayaa dhawaan la soo gelin doonaa

<https://go.usa.gov/xtGXe> oo cinwaankeedu yahay Warbixinta Sharciga Senate-ka ee 710 "Senate Bill 710 Reports."

Warbixinta waxaa ku jira tilmaamo loogu talagalay akhrinta warbixinta, warbixin kooban oo ka socota ODDS iyo tiro xubno ah oo ka socda Guri Wax Marti Geliya iyo barnaamijka Guryaha la degan yahay ee Carruurta oo kasta. Warbixinta mustaqbalka ayaa la soo gelin doonaa <https://go.usa.gov/xtGXe>.

Waxaan jeclaan lahaa in aan u mahad celiso dhammaan hay'ada daryeelka bixisa iyo shaqaalaha ODDS ee ka shaqeeyay dejinta, la socodka iyo hirgelinta warbixintani cusub. Warbixintu waxay noo dhaqaajinaysaa dhanka barnaamij si aad ah loo adeegsanayo xog wuxuuna waxtar u yeelan doonaa siyaasada mustaqbalka iyo ka wada hadalka nidaamka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.